# allemansrätten

XUQUUQDA LOO SIMANYAY EE KU TAMASHLEYNTA DABEECDA

Iswiidhan ayuu qof waliba xaq u leeyahay inuu dabeecadda Iswiidhan dhexgalo, xataa dhulka gaarka ah. Waxaanna taas lagu magacaabaa Allemansrätten (Xuquuqda siman ee dhammaan dadka Iswidhan deggeni u wada leeyihiin ku tamashleynta dhulka dibedda ah iyo kaymaha). Waxaad u baahan tahay inaad ixtiraanto xawayaanka, dabeecada iyo qofka dhulka leh iyo dadka aad dabeecadda kula kulanto.

## Ku dhexsoco, bushkileeti ku dhexwado oo fardo ku dhex raac

Waxa laguu ogol yahay inaad dabeeacadda ku dhex lugeyso, bushkileeti ku dhexwado, oo aad fardo ku dhex fuusho. Laakiin waa inaanad marin dhul/goof gaar loo leeyahay, dhul geedo laga beeray ama dhul beeran. Dhulka gaarka ahi waxa weeye dhul guriga ku agyaal oo qofka guriga deggani xaq u leeyahay inuu arbush la'aan ku isticmaalo. Iska ilaali inaad bushkileeti ama fardo ku wadato dhabooyinka carro jilicsan leh ama dhul kaloo leh carro nugul.

## Baabuur iyo waddooyin gaar ah



Waxaa mamnuuc ah in baabuur, mootooyin iyo dhugdhugley dhulka dooxooyinka oo aan barafka lahayn. Dhulkaas waxaa ka mid ah dhammaan dhulka dooxooyinka ah sida dariiqyada, goobaha ciyaaraha iyo wadiiqooyinka lagu lugeeyo. Waxaan sidoo kaloo la ogoleyn in gaadiid matoor ku shaqeeya lagu wado waddooyinka dadku gaarka u leeyahay. Waase lagu dhexlugayn kara oo bushkileeti lagu dhexwadi karaa jidadka gaarka ah.

## Teendhooyinka iyo guryaha baabuurta ku xiran

Dabeecadda ayaad dhowr habeen ka dhexdhisan kartaa teendho. Haddiise aad dooneyso inaad muddo badan degganaanto ama aad guri ka ag taagato, ayaad kolka hore ruqsad weyddiisaneysaa cidda dhulka iska leh. Lama oggola in lagu dhexwado gaari meel jidadka ka baxsan, tusaale ahaan xeebta ama dooxo doog ah.

## Biyaha




Waxaad xaq u leedahay in aad xeebaha doon ku waddo, ku ag xirato waqti gaaban, ku lugeyso ama ku dabaalato oo aan ka ahayn dhulka u dhow guriga la deggan yahay. Fiira gaar ah u yeello in ay jiraa dhul loo gooyey oo lagu ilaaliyo shimbiraha iyo dhul kale oo ay mamnuuc ka tahay in biyaha lagu dabaasho ama dhulka lagu socdo. Dhulka noocaas ahna waxaa badiyaa ku dhegsan calaamado ama maabka badda ama khariirad.



## Kalluumeysiga

Kaluumaysiga ayaan ka mid aheyn xuquuqda siman ee dhammaan dadka Iswidhan deggeni u wada leeyihiin ku tamashleynta dhulka dibedda ah iyo kaymaha, laakiin hadana waxaad xaq u leedahay in si xor ah oo kharash la'aan ah uga kalluumetsato dhammaan xeebaha badaha iyo shanta harood ee waaweyn oo Iswiidhan yaal adigoo isticmaalaya qalabka lagu kalluumeysto oo fudud. Si biyaha intaas dhaafsan looga kalluumeysato waxaa loo baahan yahay shati kalluumeysi ama ruqsad. Kalluumeysiga la oggol yahay waxaan ku jirin kalluumeysiga lagu jillaabto shabakadaha, doonyaha iyo qalabyada kaloo kale. Waxaan kaloo la kalluunsan karin kalluun nooca lax ama salmon oo ku nool xeebaha Norrland.

## Ugaarsiga iyo Eyda

Iska nabadgali godadka iyo buulasha xayawaanka oo ubadkooda ammaan sii. Waxaa mamnuuc ah in la rabsho ama dhaawac loo geysto xayawaanka. Waxaa kaloo aan la oggolayn in eyda lagu siidaayo oo ay dhexordaan dabeecadda inta u dhexeysa 1da Maarso ilaa 20ka Ogosto kolkaas oo ah kolka xayawaanku ubadka dhalaan. Xataa waqtiyada kale waa in eyga laga warhayaa oo la ilaaliyaa kolka uu dabeecadda ku dhexjiro. Waxaa caadi ah in dhul badan oo furan, buuraha iyo jasiiradaha, ayay tahay in eyga lagu xiro xadhig.

## Dab

Waxaa mamnuuc ah in waqtiga kuleylaha dab la shido. Markaas ayuu mamnuuc yahay dhammaan dababka furan, xataa meelaha loogu talagalay in dab lagu shido. Inta ka sokowse waxaa la oggol yahay in dab la shido iyadoo si taxadar ah oo la hubiyo in dabka la damiyo. Marka hore isticmaal meelaha dabka loogu talagalay. Weligaa dab ha ku shidin dhagaxaanta buurta – waa ay jajabayaan!

## Miro, like iyo ubax

Waxaad guran kartaa miraha, likaha iyo ubaxa iskii u baxa oo aan sharcigu mamnuucayn. Laakiin waxs mamnuuc ah in la gooyo ama dhaawac loo gesyto dhir ama laamo la jebiyo ama dhirka diirka laga xoqo ama dhaawac kale loo gesyto geed soo baxaya iyadoo aan ruqsad loo haysan.

## Qashinka sii qaado!

Waxaa mamnuuc ah in qashin lagu tuuro ama looga tago guryaha dibeddooda. Waxa kaas xitaa ka mid ah qashinka yaryar sida haashka sigaarka iyo buuriga. Iska ilaali inaad hadhaaga cuntada sid ahilibka daadiso waxay wadan karaan wax faafa.

## Dabeecadda sharcigu ilaaliyo

Dhulka sharcigu ilaaliyo oo ay ka mid yihiin beeraha qaranka iyo seerooyinka waxaa lagu maamulaa sharci kale oo xaddadaya Xuquuqda siman ee dhammaan dadka Iswidhan deggeni u wada leeyihiin ku tamashleynta dhulka dibedda ah iyo kaymaha taas oo keeneysa inaanad teendho ka dhisan. Xitaa meelaha kale, tusaale ahaan meelaha furan ayaa waxa ka jiri kara xeerar kale oo hoose. Astaantaani waxay u taagan tahay dabeecad sharcigu ilaaliyo.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqda loo siman yahay ee ku tamashleynta dabeecda (allemansrätten) booqo naturvårdsverket.se.**

**Haddii aad dooneyso warbixino dheeraad ah iyo xeerarka khuseeya meesha aad joogto, la xiriir degmada ama maamulka gobolka**